**War** saxaafadeed

# Alberta iyo Ottawa oo kala saxiixday heshiis taariikhi ah oo tamarta ku saabsan

27 Nofeembar, 2025

Dowladaha Kanada iyo Alberta waxay kala saxiixdeen heshiis cusub oo lagu labanlaabayo dhoofinta saliidda suuqyada Aasiya, laguna xallinayo hubin la'aanta maalgashiga, isla markaana lagu yareynayo qiiqa wasakheeya deegaanka.

Iskaashigan cusub ee tamarta ah waa tallaabo muhiim ah oo lagu gaarayo hadafka ay wadaagaan Alberta iyo Kanada ee ah in dalkeenu noqdo awood tamareed oo heer caalami ah, isla markaana lagu dhisayo dhaqaale xooggan oo kobcaya.

Heshiiska cusub ee tamarta wuxuu ka koobanyahay:

- Bayaan ay dowladdu ku caddeyneyso in dhuunta gaarka loo leeyahay ee batroolka Alberta ee ay wada leeyihiin bulshada asaliga ah (Indigenous) oo u dhoofeysa suuqyada Aasiya ay tahay mashruuc muhiimad qaran leh.
- Heshiis ah in labada dhinac ay si wadajir ah uga shaqeyn doonaan fududeynta codsiga, ansixinta iyo dhismaha dhuun batrool oo maalgelin gaar loo leeyahay lagu dhisayo, awooddeeduna dhaafto hal milyan oo foosto maalintii, oo sidoo kale ay wada leeyihiin shacabka asaliga ah, kana dhoofeysa deked biyo qoto dheer oo istaraatiiji ah una socota suuqyada Aasiya.
- Ballanqaad dowladda federaalka ah in aysan hirgelin doonin xadka qiiqa ee ay hore ugu talagaleen warshadaha batroolka iyo gaaska.
- Joojinta degdegga ah ee Xeerarka Korontada Nadiifka ah ee federaalka, iyo heshiis ah in labada dhinac ay ka shaqeeyaan dhismaha kumannaan megawatt oo awood kombuyuutar AI ah, qayb weynna loogu talagalay kombuyuutarka qaranka ee Kanada iyo xulafadeeda.
- Ballanqaad ay labada dowladood ku maalgelinayaan una dhisayaan shirkadaha Pathways mashruuca ugu weyn adduunka ee qabashada, ka faa'iidaysiga iyo kaydinta kaarboonka (CCUS), si batroolka Alberta uu uga mid noqdo kuwa ugu hooseeya qiiqa culus ee dunida.
- Si loo gaaro qiiqa eber (Net Zero) sanadka 2050, dowladaha Alberta iyo federaalka waxay naqshadeyn doonaan una heellan doonaan qiimeyn tartan caalami ah oo muddo dheer ah ee kaarboonka, iyo xeerar adag oo gaar u ah qaybaha batroolka, gaaska iyo korontada, ka hor April 1, 2026, taas oo lagu fulin doono nidaamka TIER ee Alberta.
- Heshiis ku saabsan isku-dheelitirnaanta methane oo la gelayo ka hor April 1, 2026, iyadoo bartilmaameedka 2035 uu yahay in la dhimo methane ka 75% marka loo eego heerka sanadka 2014.
- Heshiis si degdeg ah loola tashado loona shaqeeyo bulshooyinka asaliga ah iyo dowladda British Columbia, si loo hubiyo in dadkaas ay helaan faa'iido dhaqaale iyo maaliyadeed oo weyn oo ka imanaysa dhuunta.

- Yaraynta si weyn ee hubin la'aanta sharciyada, iyadoo la beddelayo sharciyo, xeerar iyo siyaasado kala duwan.

Heshiiska cusub wuxuu sidoo kale muujinayaa in Alberta iyo Kanada labaduba ay diiradda saarayaan siyaabaha lagu kordhin karo soo saarista iyo dhoofinta batroolka iyo gaaska Alberta, lagu kobcin karo warshadaha xarumaha xogta AI iyo kuwa la xiriira ee Alberta, laguna taageeri karo Kanada gaarsiinta yoolalka amniga qaranka, laguna abuuri karo boqolaal kun oo shaqooyin cusub, iyadoo isla mar ahaantaas la dhimayo qiiqa wasakheeya ee batroolka, gaaska iyo korontada Kanada, iyadoo loo marayo horumarinta iyo hirgelinta teknoolojiyadda CCUS, tamarta nukliyeerka iyo teknoolojiyado kale oo yareeya qiiqa.

"Tani waa fursadda Alberta ee qaadashada tallaabooyinkii ugu horreeyay ee lagu noqon lahaa awood tamareed oo heer caalami ah oo muujinaysa in horumarinta khayraadka iyo joogteynta deegaanka ay wada jiri karaan. Shaqo adag ayaa hore inoo sugaysa, balse maanta waa halkii cusub ee laga bilaabi lahaa dhismaha qaranka, annagoo kordhineyna wax soo saarka tamarta si ay uga faa'iideystaan malaayiin qof oo aan dhiseyno xiriir cusub oo u dhexeeya Alberta iyo dowladda federaalka''

*Danielle Smith, Gudoomiyaha Gobolka Alberta*

**Dhuun saliid**
Dhuunta bitumen-ka ee ay wada leeyihiin dadka asaliga ah (Indigenous) oo u dhoofeysa suuqyada Aasiya waxay xaqiijinaysaa in gobolka iyo dalka aanay mar dambe ku tiirsanaan hal macaamiil oo keliya si ay u iibsato kheyraadkooda ugu qiimaha badan. Waxaa la isku raacay in dhuuntan cusub ay noqon doonto mid lagu kordhiyo ballaarinta dhuunta Trans Mountain oo sii kordhin doonta dhoofinta 300,000 ilaa 400,000 foosto maalintii oo loo wado suuqyada Aasiya.

Heshiiskani wuxuu sidoo kale oggolaanayaa in wax-ka-beddel lagu sameeyo xayiraadda doomaha marka dhuunta cusub ee Aasiya uu ansixiyo xafiiska mashaariicda waaweyn, iyo sidoo kale wax-ka-beddello lagu sameeyo si loo hubiyo in shirkadaha tamarta Alberta ay si caalami ah ugu xayaysiiyaan hoggaamintooda deegaanka iyo dadaalladooda iyaga oo aan ka cabsanayn ciqaab.

"Dhuuntan waa fursad heer sare ah oo lagu muujinayo iskaashi iyo horumar. Rajadaydu waa in ay abuurto faa'iidooyin dhaqaale oo waara oo ay helaan First Nations, isla markaana ay xoojiso xiriirrada ugu muhiimsan dowlad iyo dowlad iyo bulsho-iyo-bulsho. Ka qayb qaatashada hantida ee dadka asaliga ah ayaa qaabeynaysa dhaqaalaha Kanada, waxaana marka codkeenna uu hoggaamiyo go'aan kasta, aan dhisnaa kalsooni iyo mustaqbal taageeri doona jiilalka soo socda."
*George Arcand Jr, Taliyaha, Alexander First Nation*

**Xadka qiiqa saliidda iyo gaaska**
Dowladda federaalka ayaa sidoo kale ballanqaadday in aan la hirgelin xadka qiiqa saliidda iyo gaaska, taas oo oggolaanaysa koror ballaaran oo ku yimaada wax soo saarka saliidda iyo shaqooyinka qaybta gaarka ah, isla markaana Alberta loo dhaqaajinayo dhanka yoolkeeda ah inay

gaarto lix milyan oo foosto maalintii sanadka 2030 iyo siddeed milyan oo foosto maalintii sanadka 2035. "

"Heshiiska Tamarta ee maanta ay kala saxiixdeen Ra'iisul Wasaare Carney iyo Raiisul Wasaaraha Alberta Smith wuxuu dirayaa fariin muhiim ah oo ah in horumarinta saliidda iyo gaaska Kanada ay laf dhabar u tahay dhaqaalaha isla markaana ay diyaar u tahay ganacsi. Heshiiskan wuxuu muujinayaa in Kanada ay tallaabo ka qaadeyso xeerarka iyo siyaasadaha saameynaya tartanka iyo maalgashiga."
*Tristan Goodman, madaxa iyo maamulaha guud, Ururka Sahmiyaasha iyo soo Saarayaasha Kanada (The Explorers and Producers Association of Canada)*

"Golaha Ganacsiga Alberta aad ayuu ugu faraxsan yahay in la qaado xadka qiiqa saliidda iyo gaaska, kaasoo ahaa xad ku yaalay wax-soo-saarka iyo barwaaqada Kanada. Hadda, iyadoo aan xad jirin, Kanada si dhab ah ayay u kordhin kartaa wax soo saarka tamarta, u dhoofin kartaa caalamka, waxayna abuuri kartaa maalgashi iyo shaqooyin keenaya nolol wanaagsan dhammaan dadka reer Kanada."
*Adam Legge, Madaxa Sare, Golaha Ganacsiga Alberta (Business Council of Alberta)*

**Xeerarka Korontada Nadiifka ah**
Heshiiska wuxuu sidoo kale ka koobanyahay joojinta degdegga ah ee Xeerarka Korontada Nadiifka ah ee Alberta, taas oo xasilin doonta shabkadda korontada Alberta isla markaana sahli doonta maalgashi weyn oo lagu sameeyo xarumaha xogta AI ee gobolka. Halkii taas laga hirgelin lahaa, Alberta waxay la shaqeyn doontaa dowladda federaalka iyo warshadaha si loo sameeyo heshiis cusub oo ku saabsan qiimeynta kaarboonka warshadaha, kaas oo lagu maamuli doono barnaamijka TIER ee Alberta.

**Wadada iyo dhimista qiiqa**
Labada dowladoodba waxa ay isku raaceen in ay si wadajir ah ula shaqeeyaan shirkadaha Pathways si loo hormariyo dhamaystirka mashruuca ugu weyn adduunka ee kaabayaasha CCUS.

Tani waxay Alberta ka dhigi doontaa hoggaamiye caalami ah oo ku saabsan horumarinta iyo hirgelinta kaabayaasha yareeya qiiqa gaar ahaan qabashada, ka-faa'iidaysiga iyo kaydinta kaarboonka. Batroolka bitumen Alberta wuxuu ahaan doonaa batroolka culus ee ugu nadiifsan dunida, isagoo beddelaya batroolka qiiqa badan ee ka yimaada Ruushka, Venezuela iyo Iiraan, isla markaana keenaya natiijooyin deegaan iyo kuwo juqraafi siyaasadeed oo ka wanaagsan.

"Pathways Alliance waxay qadarinaysaa hoggaanka Ra'iisul Wasaare Carney iyo Raiisul Wasaaraha Smith ee gelitaanka Memorandum of Understanding-kan muhiimka ah kaas oo taageeraya kobaca warshad aad muhiim ugu ah dhaqaalaha Kanada. Waxaan rajeyneynaa in aan la shaqeyno labada dowladood ee federaalka iyo Alberta bilaha soo socda, annagoo wadaaganna yoolka ah in Kanada noqoto awood tamareed oo caalami ah."
Kendall Dilling, madaxweynaha, Pathways Alliance

**Xogta la xiriirta**

- Is afgarad dhexmaray Dowladda Kanada iyo Dowladda Alberta (Memorandum of Understanding between the Government of Canada and the Government of Alberta)

**Warbaahinta kala duwan**

- Daawo Wararka shirarka (Watch the news conference)

**Weydiimaha warbaahinta**

Sam Blackett
Sam.Blackett@gov.ab.ca
587-589-6048
Xoghayaha Warfaafinta, Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka